

“Cod Siinta Kuwa Marar Dhif ah uun La Maqlo”

Haynta Xaaladaha Deg dega ah iyo Haynta Maxkamada

1) HAYNTA XAALADAH A DEG DEGA AH: MN. Stat. 253B.051

Goorma ayaa la isticmaali karaa haynta xaaladaha degdega ah?

Nidaamka haynta ee xaaladaha degdega ah waxaa la bilaabaa markii baaraha, sarkaalka nabada ama sarkaalka caafimaadku ay hayaan sabab macquul ah oo ay ku aaminaan inaad qabto cudurka dhimirka ama naafonimo xagga koriinka ah ama aad kiimiko ku tiirsantahay oo aad khatar ugu jirto inaad naftaada ama dadka kale waxyeello u gaysato.

Haddii lagu keeno xarun daawayn, barnaamijka daawaynta ee ay maamusho dowladu ama barnaamijka daawaynta bulshada dhexdeeda ku salaysan oo uu ku keeno sarkaalka nabada ama sarkaalka caafimaadka oo ay xarunta ama barnaamijku ku raacsanyihiin inaad leedahay mid ka mid ah naafonimadan oo ay u muuqato inaad waxyeelaynayso naftaada ama dadka kale, xarunta ama barnaamijka ayaa laga yaabaa inay ku aqbalaan.

Sarkaalka ayaa bixin kara gaadiid shaqsi ahaan ama wuxuu kuu diyaarin karaa gaadiid bixiye caafimaad ama bixiyaha gaadiidka caafimaadka dhimirka ah oo haboon. Markay suurtagaltahay, sarkaalka nabada ee bixinaya gaadiidku waa inuusan ku labisnayn dirays oo gaadiidkuna waa inuu ahaado gaari aan calaamadaysnayn.

Muddo intee le'eg ayaa la igu hayn karaa haynta xaaladaha degdega ah?

Kadib marka lagu keeno xarunta ama barnaamijka, laguguma hayn karo wax ka badan 12 saacadood ilaa laga helo amarka haynta xaaladaha degdega ah oo uu bixiyo Baaruhu.

Mar haddii haynta xaaladaha degdega ah la bilaabo, waxaa lagugu hayn karaa xarun ama barnaamij ilaa 72 saacadood, marka laga reebo dhammaadka asbuuca ama feestooyinka sharciga ah. Tusaale ahaan, haddii amarka haynta la saxiixay 2 pm maalin Khamiis ah, waxay sii soconaysaa illaa Talaadada 2 pm.

Maxay yihiin xuquuqaha aan leeyahay haddii la i geliyo haynta xaaladaha degdega ah ee xarun ama barnaamij daawayn ah?

- bixitaanka 72 saacadood kadib, aan ka ahayn haddii ay maxkamadu ku amarto in lagu sii hayo
- baaritaan caafimaad muddo 48 saacadood gudahood ah ka dib marka lagu aqbalayo;
- in aad codsato beddelaad lagu sameeyo haynta xaaladaha deg dega ah oo lagu beddelo xaalada hayn ikhtiyaari ah;
- in aad hesho nuqul qoraalka bayaanka ah ee ogolaanaysa xiritaankaaga; iyo
- in aad codsato dhagaysi kooban oo ku saabsan u siidaynta haynta xaaladaha deg dega ah.

2) HAYNTA MAXKAMADA: MN. Stat. 253B.07 subd. 2b

Goorma ayaa la isticmaali karaa haynta maxkamada?

Maxkamad ayaa amri karta in lagu geeyo xarunta daawaynta ama barnaamijka daawaynta ee dowladu maamusho ama in lagugu hayo xarunta daawaynta ama barnaamijka daawaynta ee dowladdu maamusho. Hayn maxkamadeed ayaa la soo saari karaa marka:

- A. aad khatar ugu jirto inaad naftaada ama dadka kale u gaysato dhaawac halis ah in meel lagugu hayo mooyee;
- B. aad ku guul daraystay in aad timaado baaritaanka ama dhagaysiga xukminta daawaynta; ama
- C. aad horayba ugu jirtay haynta xaaladaha degdega ah oo xukminta daawaynta la xareeyay.

Waa lagu hayn karaa ilaa dhagaysiga hordhaca ah la sameeyo ama 72 saacadood, marka laga reebo maalmaha dhammaadka todobaadka iyo feestooyinka sharciga ah, hadba midkii gaaban. Maxkamadu waxay ku sii kordhin kartaa haynta maxkamada wakhti dheeri ah haddii la buuxiyo heerka haynta maxkamada.

Bayaanka ADA: Haddii aad naafonimo leedahay oo aad rabto ogaysiiskan oo qaab kale ah waxaad ka dalban kartaa degmada ama haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan habka xukminta daawaynta, la xiriir Xafiiska sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka, 121 7th Place E., Suite 420 Metro Square Bldg, St. Paul, Minnesota 55101, <https://mn.gov/omhdd/> Cod: 651-757-1800 ama Khadka Bilaashka ah: 1-800-657-3506.